# Xeerka Magangalyada Caalamiga ah 2015

**[Bayaanka lagu bixinayo sida waafaqsan qeybta 70aad (10) (a) ee Xeerka Magangalyada Caalamiga ah 2015]**

## Qoraalka Warbixinta - Diyaarinada Kumeelgaarka

## Hordhaca NIDAAMKA CODSI KALIYA AH ee baaritaanka iyo go'aaminta codsiyada Magangalyada Caalamiga ah (Sharciga Qaxootiga iyo Magangalyada Caalamiga ah) iyo Ogolaanshaha Lagu joogayo

**Bayaankaan waa warbixinta iyo tilmaanta kaliya. Ma ahan talo sharci oo si lid ku ah uma siiso fasiraada sharci ah ee Xeerka Magangalyada Caalamiga ah 2015. Qoraalkaan wuxuu kaliya soo sharaxaaya qeybaha mabaa'di'da ee dacwadaha ee ay saameysay qodobada kumeelgaarka ee Xeerka Magangalyada Caalamiga ah 2015. Ma sharaxaayso dhammaan xaaladaha suurtogalka ah halka qodobada ku meelgaarka ah laga yaabo inay quseyso. Haddii aad u baahato warbixin sharaxaad badan ee Xeerka 2015 iyo qodobadooda sida ay ku codsanayaan dacwadaada, waa inaad raadisaa talo sharci.**

**Qoraalka Warbixintaan waa in lala kaashadaa Buugyaraha Warbixinta gooniga ah ee Codsadaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 1) iyo Codsiga Foomka Su'aalaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 2) kaas oo ku lifaaqan.**

**1. Hordhaca**

1.1 Xeerka Magangalyada Caalamiga ah, 2015 (Xeerka 2015) waxaa bilaabay Wasiirka Cadaaladdaiyo Sinnaanta ("Wasiirka") ee **31 Desembar 2016**. Qoraalkaan, tani waxaa loo yaqaan sida "taariikhda bilaabida".

1.2 Qoraalka Warbixintaan wuxuu ku siinayaa sharaxaadaha diyaarinada kumeelgaarka ee

maamulayo baaritaanka iyo go'aaminta codsiyada (ee heerarka qaarkood ee nidaamka) ee magangalyada caalamiga ah (heerka qaxootiga iyo magangalyada caalamiga ah) sida waafaqsan Xeerka Magangalyada Caalamiga ah, 2015 kaas oo lagu sameeyay Gobolka (Ireland) ka hor
taariikhda bilaabida. Waxay sidoo kale bixisaa sharaxaado qaarkood ee la xiriiro ogolaanshaha lagu joogayo.

1.3 Waxaa loogu talo galay inay kugu caawiso fahamka diyaarinada lagu codsanayo wareejinta

- codsiyada qaarkood ee heerka qaxootiga iyo magangalyada caalamiga ah ee ka imaaneyso Guddiga Xafiiska Codsiyada Qaxootiga(ORAC) iyo
- racfaanada qaxootiga qaarkood ee Maxkamada Racfaanada Qaxootiga (RAT)

kaas oo lagu sameeyay ka hor 31 Desembar 2016, ee Xafiiska Magangalyada Caalamiga ahee Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka ee dhameystirka ka baaran dagida sida waafaqsan Xeerka 2015.

1.4 Warbixin badan oo sharaxan ee sababaha ee qofka ugu qalmo ku dhawaaqida heerka qaxootiga ama magangalyada caalamiga iyo nidaamyada si loo codsado Xafiiska Magangalyada Caalamiga ah(IPO) waxaa lagu tilmaamay Buugyaraha Warbixinta gooniga ah ee Codsadaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 1). Buugyaraha sidoo kale wuxuu sharaxaa waxa xaquuqdaada iyo waajibaadyadaada ay yihiin sida codsadaha magangalyada caalamiga ah iyo cida aad la xaajooneysid inta lagu jiro nidaamka codsiga. Buugyaraha sidoo kale wuxuu tilmaamayaa nidaamyada quseeyo tixgelinada ogolaanshaha lagu joogayo ee Wasiirka ee sababaha aan ka aheyn baahida magangalyada caalamiga ah.

1.5 Waxaan sidoo kale ku soo lifaaqeynaa Codsiga foomka Su'aalaha Magangalyada Caalamiga ah(IPO 2).

1.6 Waa muhiim indanahaaga aad ku akhrisid Qoraalka Warbixintaan iyo Warbixinta Buugyaraha ku lifaaqan iyo Foomka su'aalaha si taxadar ah oo raadi talo sharci sida loo baahanyahay si markaas aad u joogtid booska lagu taageerayo codsigaaga iyo **si loo hubiyo inaad fahamsantahay sida diyaarinada kumeelgaarka ee Xeerka 2015 kuu quseyso adiga.**

## 2. Ujeedada Xeerka Magangalyada Caalamiga ah2015

2.1 Xeerka 2015 wuxuu bixiyaa hordhaca nidaamka codsiga kaliga ee u suurtogaliyo

dhammaan sababaha lagu raadinayo magangalyada caalamiga ah (heerka qaxootiga iyo magangalyada **caalamiga ah) iyo ogolaanshaha loogu joogayo wadanka sababo kale ee la baarayo iyo go'aaminta hal nimaad oo isku xiggo.**

2.2 Xeerka 2015 wuxuu wataa diyaarinada ku meelgaarka ah ee quseeya codsiyada qaarkood ee heerka qaxootiga iyo magangalyada caalamiga ah ee la sameeyay ka hor taariikhda bilaabida (**fiiri qeybta 4aad**).

**3. Cida go'aansaneyso codsiyada iyo racfaanada sida waafaqsan Xeerka 2015?**

3.1 Sida waafaqsan Xeerka 2015, ORAC waa la baabi'inayaa. Masuuliyada baaritaanka iyo go'aaminta codsiyada ee magangalyada caalamiga ah iyo ogolaanshaha la xiriiro ee lagu joogteynayo arimaha lagu daboolay Qoraalka Warbixintaan waxaa tan iyo xiligaas waa la badelay, maadaama taariiqda bilaabida iyo maddada qodobada Xeerka 2015, ee lagu wareejiyay Xafiiska Magangalyada Caalamiga ah (IPO) ee Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka ee Irish (INIS).

3.2 Sida waafaqsan Xeerka 2015, RAT sidoo kale waa la baabi'iyay. Masuuliyada go'aaminta racfaanada sida quseyso codsiyada magangalyada caalamiga ah waxay leedahay tan iyo taariikhda bilaabida iyo waafaqsan qodobada Xeerka 2015, loo wareejiyay Maxkamada Racfaanada Magangalyada Caalamiga ah(IPAT).

**4. Diyaarinada kumeelgaarka ah ee codsiyada u jiray heerka qaxootiga iyo magangalyada caalamiga ah aanan la soo afjarin ka hor taariikhda bilaabida**

4.1 Illaa codsiga lagula macaamilayo sida waafaqsan Sharciga EU ee Dublin, taas oo bedelka diyaarinada qaarkii ay quseyso (fiiri qeybta 10aad ee Warbixinta Buugyaraha Codsadaha ee Magangalyada Caalamiga ah), diyaarinada kumeelgaarka xigta waxay quseyneysaa codsiyada heerka qaxootiga iyo ilaalada caalamiga ah ee la sameeyay ka hortaariikhda bilaabida iyo kaas oo aanan la soo afjarin taariikhdaas.

**Qeybta 1aad - Codsiyada qaxootiga ee ORAC**

Haddii aad sameysid codsiga heerka qaxootiga ka hor taariikhda bilaabida laakin wargelin aysan ku diyaarin ORAC sida waafaqsan qeybta 13aad ee Xeerka Qaxootiga, 1996 ee taariikhdaas (micnaha kale, talo lama sameynin), codsigaaga waxaa loo arkayaa inuu yahay codsiga magangalyada caalamiga ah (labadaba qaxooti iyo

magangalyada caalamiga ah) sida waafaqsan Xeerka 2015. Feelkaaga waxaa loo gudbiyay Xafiiska Magangalyada Caalamiga ahee tixgelinta haddii aad u qalantid ama aadan u qalmin ku dhawaaqida heerka qaxootiga ama magangalyada caalamiga ah.

Haddii aad u aragtid inaadan u qalmin midkood heerka qaxootiga ama magangalyada, Wasiirka wuxuu isla markaaba tixgelinayaa haddii ay tahay in lagu siiyo ogolaanshaha loogu joogayo sababaha kale. Go'aankaan wuxuu ku saleysanyahay dhammaan waraaqaha aad marhore leedahay ee la gudbiyay oo laguma weydiinayo inaad sameysid codsi cusub ee ogolaanshaha lagu joogayo.

**Qeybta 2aad - Racfaanada qaxootiga**

Haddii codsigaaga heerka qaxootiga uu ahaa racfaanka RAT ka hor taariikhda bilaabida laakin maysan go'aansan RAT taariikhdaas, waxaa laguu arkayaa inaad ku codsatay magangalyada caalamiga ah sida waafaqsan Xeerka 2015. Feelkaaga waxaa loo wareejiyay IPO oo tixgelinta u qalmidaada magangalyada caalamiga ah kaliya. Xaaladaha noocaas ah, talada codsigaaga heerka qaxootiga waxaa sameeyay ORAC waxaa la dhowrayaa oo meel ayaa lagu joogteynayaa. Haddii IPO ku taliso in aanan lagu siinin magangalyada caalamiga ah, Wasiirka wuxuu isla markaaba tixgelinayaa haddii ay tahay in lagu siiyo ogolaanshaha loogu joogayo sababaha kale. Racfaanka hore ee RAT waa la joogteynayaa oo loo gudbinayaa IPAT-ka cusub. Haddii laguu diido magangalyada caalamiga ah, waxaad sidoo kale ka racfaan qaadan kartaa talada magangalyada caalamiga ah IPO ee IPAT iyo labada racfaan waxaa loola dhaqmayaa sida mid lawada maqlay. Haddii sidoo kale ay kuu diido ogolaanshaha lagu joogayo IPO, waa inaad ogaataa in sida waafaqsan Xeerka 2015 kama racfaan qaadan kartid go'aanka ogolaanshaha lagu joogayo IPAT.

**Qeybta 3aad – Magangalyada Caalamiga**

Haddii aad codsatid magangalyada caalamiga ah ka hor taariikhda bilowga iyo ORAC maysan bilaabin baaritaankooda ee taariikhdaas, codsigaaga waxaa loo arkayaa inuu yahay codsiga magangalyada caalamiga ah sida waafaqsan Xeerka 2015. Feelkaaga waxa loo wareejiyay IPO oo tixgelinta arrimo walboo magangalyada caalamiga ah kaliya. Dacwad noocaas ah, talada codsiga heerkaaga qaxootiga ee uu sameeyay ORAC (ama

go’aanka RAT ee racfaanka, haddii ay quseyso) waa la joogteynayaa oo meel ayuu ku harayaa.

**Warbixinta kale**

(i) Haddii aad codsatid magangalyada caalamiga ah ka hor taariikhda bilaabida iyo ORAC waxay bilowday baaritaanka codsiga taariikhdaas, codsiga ma saameynin Xeerka 2015, markii laga qeyb yeelo xaqiiqda ee in IPO la wareegto shaqooyinka ORAC. Sharciga horay u jiray wuu sii quseynayaa iyo IPO ayaa ku baareyso codsigaaga sida waafaqsan nidaamyada hore.

(ii) Haddii aad sameysay codsiga magangalyada caalamiga ah iyo codsigaan uu yahay racfaanka RAT ka hor taariikhda bilaabida, racfaanka waxaa loo wareejinayaa IPAT taas oo ku go’aansaneyso sida waafaqsan sharciga jiray.

## 5. Ogolaanshaha Lagu joogayo

5.1 Haddii IPO ku taliso in codsigaaga magangalyada caalamiga ah sida waafaqsan Xeerka 2015 waa la diidayaa (haddii sida quseyso heerka qaxootiga iyo magangalyada caalamiga ah ama magangalyada caalamiga ah kaligeed), go’aanka ayaa kadib loo sameynayaa sida haddii ay tahay in lagu siiyo ogolaanshaha loogu joogayo sabab kale.

5.2 Waa muhiim in la ogaadoin nidaamyada ay isbedeleen halka xeerka 2015 u quseeyo gudaha illaa iyo hadda sida Wasiirka markale makuu soo qorayo oo kugu casuumayo inaad matalaado sameysid sida sababta ah in laguu siiyo inaad joogtid Wadanka. Bedelkii, tani waxaa tixgelinayo IPO haddii lagu taliyo in codsigaaga magangalyada caalamiga ah in la diido. Go’aanka waxaa lagu sameynayaa si ku saleysan warbixinta iyo waraaqaha marhore lagu bixiyay dacwadaada.

5.3 Sidaas darteeda, haddii dacwadaada ay tahay mid loogu bedelay IPO tixgelinta sida codsiga magangalyada caalamiga ah sida waafaqsan Xeerka 2015, waa inaad qoraal ahaan ku qorta sababowalba aad u tixgelisid in lagu siiyo ogolaanshaha lagu joogayo qeyb ku haboon ee Codsiga foomka Su’aalaha Magangalyada Caalamiga ah(IPO 2). Tusaale ahaan, qoyskaaga iyo xaaladaha guriga, nooca xiriirkaaga Wadanka, sifadaada iyo anshaxa labadaba iyo gudaha iyo ka baxsan Wadanka iyo tixgelinada aadanaha

dhammaan waa arimaha waafaqsan ee la filan karo. Sharaxaad buuxdo ee arrimaha la xiriiro, fadlan fiiri warbixinta Warbixinta Buugyaraha Codsadaha ee Magangalyada Caalamiga ah (IPO 1).

5.4 Waa inaad sidoo kale joogteysaa IPO (oo matalaada Wasiirka) la soo ogeysiiyay isbedel walba ee xaaladahaaga ee laga yaabo inay waafaqsantahay (tusaale ahaan xaaladaha qoyskaaga ama guriga ama xaalada wadankaaga asalka).

## 6. Haddii aan ku daboolanahay diyaarinada kumeelgaarka miyaan u baahanahay inaan u sameeyo codsi kale magangalyada caalamiga ah ee kale?

6.1 Haddii codsigaaga magangalyada caalamiga ah uu ka mid yahay mid ka mid ah qeybaha lagu sheegay qeybta 4aad ee kore, **uma** baahnid inaad sameysid codsi cusub ee magangalyada caalamiga ah Wasiirka laakin waa inaad raacdaa tilmaamaha eeqeybta 7aad ee hoose ee dhameystirka qeybaha quseeyo ee Buugyaraha Warbixinta gooniga ah ee Codsadaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 2).

## 7. Dhameystirka Codsiga ee Foomka su'aalaha Magangalyada Caalamiga ah

7.1 Haddii codsigaaga loo arko inuu yahay codsiga magangalyada caalamiga ah sida waafaqsan Qeybaha 1aad, 2aad ama 3aad lagu dajiyo qeybta 4aad ee kore, waa inaad u buuxisaa Buugyaraha Warbixinta gooniga ah ee Codsadaha Magangalyada Caalamiga ah sida xigta:

**Qeybta 1aad dacwadaha (heerka qaxootiga, magangalyada caalamiga ah iyo ogolaanshaha lagu joogayo)**
Fadlan u buuxi Foomka su'aalaha **si buuxdo.**

**Qeybta 2aad dacwadaha (magangalyada caalamiga ah iyo ogolaanshaha lagu joogayo)**

Fadlan buuxi Foomka su'aalaha laakin ha buuxin qeybta la xiriirto heerka qaxootiga **(Foomka su'aalaha 63a iyo 63b)**.

**Qeybta 3aad dacwadaha (magangalyada caalamiga ah iyo ogolaanshaha lagu joogayo)**

Fadlan buuxi Foomka su'aalaha laakin ha buuxin qeybta la xiriirto heerka qaxootiga **(Foomka su'aalaha 63a iyo 63b)**.

7.2 Waxaad u qalantaa inaad ku sheegtid warbixin walboo dheeraad ah **qoraal ahaan** oo taageereyso codsigaaga magangalyada caalamiga ah ee aad u tixgelisid sida ku haboon. Uma baahnid inaad dib u xareysid waraaqo walba mar hore lagu xareeyay xiriirka codsigaaga sida kuwaan ay dhammaan ku harayaan feelkaaga.

7.3 Waa inaad ku celisaa Buug yaraha ee Codsadaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 2) iyo warbixin walboo dheeraad ah ee aad ugu tiirsantahay inay taagerayso codsigaaga magangalyada caalamiga ah iyo ogolaanshaha lagu joogayo (haddii ay wax jiraan), haddii ay suurtogal tahay, **aanan ka dambeynin 20 maalmood oo shaqo** ka bilow taariikhda lagu daboolayo warqada aad heshay Qoraalka Warbixintaan ee baqshada BOOSTADA BILAASHKA AH ee ku lifaaqan

**Transitional Cases Section,**
**International Protection Office,**
**Irish Naturalisation and Immigration Service,**
**79 - 83 Lower Mount Street,**
**Dublin 2,**
**D02 ND99**

7.4 **Haddii adiga iyo/ama la taliyahaaga sharciga u baahantihiin inaad u sheegtaan warbixin dheeraad ah IPO kadib markaad xareysay warbixinta ee sadarka 7.3 ee kore, waa inaad sidaas ku sameysaa sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah iyo, haddii aad sidaas sameyn kartid, waa inaysan ka daahin labo isbuuc ka hor taariikhda wareysigaaga balansan. Baaxada wakhtigaan waxay fududeyneysaa kumeelgaarka waraaqaha haddii loo baahdo oo la hubiyo in wareystaha IPO hayo dhammaan waraaqahaaga oo dhan ee la heli karo oo loogu tixgeliyay mar hore taariikhda wareysiga.**

## 8 Goorma ayaa la igu wareysanayaa sida waafaqsan Xeerka Magangalyada Caalamiga ah 2015?

8.1 Marka aad buuxisid oo aad ku soo celisid Codsigaaga ee Foomka su'aalaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 2) iyo warbixin walboo dheeraad ah ee la socoto sida waafaqsan qeybta 7aad, Xafiiska Magangalyada Caalamiga ahayaa kula soo xiriiraya

kahor ee ku saabsan diyaarinada wareysigaaga haddii loo baahdo. Wareysigaaga laga yaabo in aanan loo balamin tirada bilaha sabab la xiriirto tirada badan ee coodsiyada ee ay ka baaran dagayaan IPO.

8.2 **Lagaama** rabo inaad si toos ah ama aan toos aheyn aad ula soo xiriirto Xafiiska Magangalyada Caalamiga ahama si aad u codsatid wareysiga.

**9 Goorma ayaa racfaankeyga soo gaaraysa IPAT?**

9.1 Haddii aad qabtid racfaanka qaxootiga oo la sugayo ee aanan laga go'aansan ka hor taariikhda bilaabida, feelkaaga waxaa loo gudbinayaa IPO sida lagu tilmaamay qeybta 4aad ee kore.

9.2 Haddii aad leedahay racfaanka magangalyada caalamiga ah ee la sugayo, tani waxaa soo gaaraysa IPAT oo waxaa ku soo ogeysiinayaa taariikhda dhagaysiga IPAT.

**10 Warbixin Dheeraad ah**

10.1 Weydiimo walba ee la xiriirto tusmooyinka Qoraalka Warbixintaan waa in loogu sheegaa **qoraal ahaan** Customer Service Centre, International Protection Office, Irish Naturalisation and Immigration Service, 79-83 Lower Mount Street, Dublin 2 ama ku **info@ipo.gov.ie**

10.2 Xeerka Magangalyada Caalamiga ah 2015 iyo Qalabyada Sharciga La socdo waxaa si buuxdalooga heli karaa **www.ipo.gov.ie**

10.3 Qoraalka Warbixintaan waxaa sidoo kale laga heli karaa tirada luuqadaha ee cinwaanka i-meelka kore.

10.4 Waxaad isticmaali kartaa adeegyada Guddiga Gargaarka Sharciga ee la xiriiro codsigaaga ee magangalyada caalamiga ah ama ogolaanshaha lagu joogayo. Haddii kale, waxaad la tashan kartaa qareen oo aad kharashka ku bixisid.

10.5 Waxaad sidoo kale u qalantaa inaad la tashatid Hay'adaha Qaramada Midoobay ee Qaxootiga ee quseeya codsigaaga magangalyada caalamiga ah.

10.6 Sharaxaadaha xiriirka ee hay'adaha lagu sheegay Qoraalka Warbixintaan waxay ku jiraan **Lifaaqa 1aad.**

**Xafiiska Magangalyada Caalamiga ah**
**Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka ee Irish**
**Janaayo 2017**

**LIFAAQA 1AAD**
**QAAR KA MID AH SHARAXAADAHA XIRIIRKA**

**International Protection Office**
Irish Naturalisation and Immigration Service,
79-83 Lower Mount Street,
Dublin 2. D02 ND99
Teleefonka: 01 6028000
Fakiska: 01 602 8122
Websaydka: www.ipo.gov.ie
I-meelka: info@ipo.gov.ie

**International Protection Appeal Tribunal**
6/7 Hanover Street, Dublin 2.
D02 W320
Teleefonka: 01 474 8400
Lo-Call: 1890 210 458
Fakiska: 01 474 8410
Websaydka: www.protectionappeals.ie
I-meelka: info@protectionappeals.ie

**Legal Aid Board**
Centre for Legal Aid Board- Smithfield,
48/49 North Brunswick Street,
Georges Lane,
Dublin 7. D07 PE0C
Teleefon: 01 646 9600.
Websaydka: www.legalaidboard.ie
I-meelka: lawcentresmithfield@legalaidboard.ie

**International Organisation for Immigration**
116 Lower Baggot Street,
Dublin 2. D02 R252
Taleefon-bilaash ah: 1800 406 406
Teleefonka: +353 1 676 0655
Websaydka: www.ireland.iom.int
I-meelka: iomdublin@iom.int

**United Nations High Commissioner for Refugees (UNHCR)**
102 Pembroke Road,
Ballsbridge,
Dublin 4. D04 E7N6
Teleefonka: 01 6314510
I-meelka: iredu@unchr.org